JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
WASAARADDA HAWLAHA GUUD, DIB-U-DHISKA & GURIYEYNTA

HINDISE SHARCIYEEDKA NIDAAMINAYA NAQSHADEYNTA MAGAALOOYINKA, HORUMARINTA DHISMOOYINKA IYO MAAMULKA DHULKA

JFS

Nuqulkii 02
Muqdisho: 20 Ogost, 2017

QABYO-QORAAL-DRAFT

TUSMO

TUSMOHORDHAC 2
HORDHAC.....3

CUTUBKA 1AAD

FASIRAAD / EREAY QEEXID 4
HORUMARINTA NAQSHADEYNTA MAGAALOOYINKA 4
DAJINTA NAQSHADEYAAL HORUMARINEED.....5
HORUMARINTA DHULKA SOOMAALIYEED & KHAYRAADKIISA...6
TILMAAMAHA GUUD EE HAGAYA HORMARINTA DHULKA 7

CUTUBKA 2AAD

GUDDIGA NAQSHADEYNTA DHULKA.....8
WAAJIBAADKA SHAQO EE GUDDIGA NAQSHADEYNTA 10
SEEROOYNTA DHULKA MAGAALOOYINKA.....11
MUDDADA DIB-U-EEGISTA NAQSHADEYNTA MAGAALOOYINKA12
JOOGTUSYADA HAGAYA DHISMAHA MAGAALOOYINKA.....13
DIB-U-NAQSHADEYNTA MAGAALOOYINKA.....13
FIDITAANKA MAGAALOOYINKA 14
DIWAAN GALINTA DHULKA.....15

CUTUBKA 3AAD

HANNAANKA DIWAAN GALINTA SHIRKADAHA DHISMAHA.....15
SHAQADA GUDDIGA DIWAAN GALINTA SHIRKADAHA 17
TALAABOOYINKA & WAXYAABAHA KA RAABAN 22
DHIIRI-GALINTA DADAALADA HORUMARINEED 23
ILAALINTA DEEGAANKA, GOOBAHA TAARIIKHIGA 24
QAABKA BIXINTA QANDARAASYADA AH 25
QODOBADA KALA GUURKA AH 26
DHAQAN GALKA XEERGA 27

HINDISE SHARCIYEED
NIDAAMINAYA NAQSHADEYNTA MAGAALOOYINKA, HORUMARINTA DHISMOOYINKA IYO MAAMULKA DHULKA

HORDHAC

1. Hindise sharciyeedkan qabyadaha, wuxuu Nidaamiyahaa dhammaan arrimaha kala duwan ee la xariira dhismaha & horumarinta magaalooyinka dalka, wuxuu qaabeynayaa howlaha farsamo ee la xariira dhismaha kala duwan.

2. Hindise sharciyeedkan, wuxuu kala xadeynayaa danta guud iyo danta gaar ahaaneed, wuxuu qaabeynayaa xilalka, waajibaadka shaqo iyo kaalinta kaga aadan hay'adaha iyo laamaha kala duwan ee dowladda. Wuxuu kobcinayaa, fududeynaa wada-shaqeynta laamaha dowladda iyo iskaashiga bulshada.

3. Wuxuu jaangoynayaa seerayaasha iyo qeybaha Dhulku u kala soocan yahay, isticmaalka u gaarka ah goob walba iyo waxa laga dhisayo, wuxuu tilmaamayaa, tusmeynayaa, ujeedooyinka iyo mabaadi'da hagaya maamulka Dhulka Magaalooyinka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed.

4. Maareynta baahida & furdaaminta dhibaatooyinka dhaqan-dhaqaale ee deegaanka haysta, iswaafajinta danaha kala duwan ee bulshada, nidaaminta doorka kala duwan ee laamaha dowladda, heer Degmo, heer Dowlad Goboleed iyo heer Qaran/Federaal.

5. Tilmaamaha nidaamiyahan, wuxuu gacansiinayaa, ilaalinta deegaanka iyo diyaarinta siyaadsad horumarineed oo Hagta, qorshayaasha ku wajahan kobcinta ilaha dhaqaalaha ee bulshada, khayraadka u gaarka ah deegaan walba iyo guud ahaan ilaha dhaqaale ee dalka.

6. Wuxuu qeexayaa, Siyaasadaha lagu maamulayo magaalooyinka dalka, heerarkooda kala sareeya A, B, C…, una qaabeysan, xaafad, degmo & xarun magaalo oo weyn.

7. Wuxuu Nidaamiyahani haggi doonaa, qorshayaasha istraatiijiyadeed ee lagu diyaarinayo ama lagu dajinayo, aragti mustaqbaleed oo lagu horumarinaayo, Dhismaha guryaha iyo Sarooyinka magaalooyinka dalka, heer Qaran iyo heer Dowlad goboleed, heer Degmo iyo heer tuulo.

8. Waxaa loogu talagalay inuu hago, laamaha dowlada ee u xilsaaran dib-u-dhiska, horumarinta kaabayaasha dhaqaalaha dalka ee Wasaaradda Howlaha Guud iyo Guriyeynta Federaalka iyo Wasaaradaha Hawlaha Guud ee heer dowlad goboleed ay Hormuud, ugu yihiin dalka arrimaha farsamo ee la xariira dib-u-dhiska Dhulka, miiga iyo Dhulka magaalooyinka

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed, iyagoo la kaashanaya qeybaha kale iyo laamaha dowladda xiriirka shaqo kala dhaxeeyo.

CUTUBKA 1AAD

QODOBKA 1AAD

FASIRAAD IYO EREY-QEEXID

1. **Dib-U-Naqshadaynta:** waxaa loola jeedaa Naqshadeynta Magaalooyinka Dalka guud ahaan ama naqshadeynta qeybo ka mid ah magaalo.

2. **Guddi:** waxaa loola jeedaa xubnaha guddi u xilsaaran naqshadeynta dhulka Qaranka.

3. **Nidaamiye:** waxaa loola jeedaa tusmeeyaha Nidaamiya Magaalooyinka cabirka Dhulka, jaantusyada iyo afgaradka farsamo ee dhismaha (Stardards and Building codes).

4. **Naqshadayn:** Waxaa loola jeedaa Jaangooyada, khariidaynta Dhulka dalka.

5. **Wasaarad:** Waxaa loola jeeda wasaaradda Hawlaha Guud iyo guriyeynta ama wasaarad ka tirsan xukuumadda Fedeeraalka.

6. **Seereynta(Zoning):** Waxaa loola jeedaa dhul isticmaal gaar ah loo naqshadeeyey, waa dhul lagu muujinayaa goobaha hawlaha addeegga lagama maarmaanka u ah nolosha bulshada, degsiimo, ganacsi, military iwm.

QODOBKA 2AAD

HORUMARINTA NAQSHADEYNTA MAGAALOOYINKA WAARAYA (Developing Sustainable Urban Plans) (Sustainbale cities/SDG)

1. Horumarinta naqshadeynta iyo casriyeynta howlaha lagu horumarinaayo Magaalooyinka siiwaarya iyo seereeynta Dhulka, iyadoo la tiigsanaayo, habka ugu fiican, uguna faa'iidada badan.

2. Jaangooynta naqshadeynta magaalooyinka iyo taabagalinta hannaan isu dheelitiran oo looga faa'iideysto, kheyraadka dabiiciga ee dhulka, taasoo

naqashadeynta lagu saleynayo, sidii loo dabooli lahaa baahida jiilka hadda jira, iyadoon wax loo dhimeyn, fursadaha Jiilasha dambe.

QODOBKA 3AAD

DAJINTA QORSHAYAAL HORUMARINEED

(a) Qorshaha istraatijiga ah: (Strategic Planning)-

Waa qorshe lagu ifinaayo, aragtida mustaqbaleed ee lagu horumarinaayo, Dhismaha iyo Seerooyinka Dalka oo dhan, heer Qaran iyo heer Dowlad gobolleed, heer Degmo iyo heer tuulo. Wuxuuna qeexaya, ujeeddooyinka iyo Siyaasadaha Hagaya qorshayaasha horumarineed ee ku wajahan kobcinta ilaha dhaqaalaha ee Dalka iyo horumarinta bulshada si loo yareeyo Saboolnimada, loona xoojiyo sinnaanta, xaqsoorka iyo caddaalada bulshada, lana gaaro hiigsiga himilooyinka horumarka waaraya (SDG).

QI, waxaa lagu jaangoynayaa fidintaanka magaalooyinka, Dhismooyinka Dalka, deegaameynta iyo dib-u-dajinta bulshada oo lagu saleynayo, hadba baahida mustaqbaleed iyo Istcimaalka kala duwan ee la xariira danta guud iyo tan gaarka. Barnaamijyada mudnaanta leh, wadiiqooyinka iyo talaabooyinka lagu hirgelin lahaa, ilaha dhaqaale ee la heli karo, si loo meel marinaayo himilooyinkaas qorsheysan.

(b) Qorshaha istraatijiyadeed ee Qaranka (Nat. Strategic Planning)-

Waa qorshe lagu ifinaayo, aragtida mustaqbaleed oo lagu horumarinaayo, Dhismaha iyo Seerooyinka Dalka. Heer Qaran iyo heer Dowlad goboleed, heer Degmo iyo heer Tuulo. Waxaana lagu qeexaa Mashaariicda Qaranka laga fulinayo, muddada lagu fulinaayo iyo kaalinta dhinac walba ku leeyahay laamaha Dowladda ee u xilsaaran hirgalintiisa.

(c) Qorshaha istraatijiyadeed ee Dowlad Gobolleed : (Fed. Member states Strategic Planning)-

Waa qorshe lagu ifinaayo, aragtida Mustaqbaleed, Siayaasadaha iyo Barnamijyada lagu horumarinaayo dhaqaalaha gobol walba, Mashaariicda laga fulin doono gobollkaas, muddada lagu fulinayo iyo kaalinta dhinac walba ku leeyahay laamaha dowladda ee u xilsaaran hirgalintiisa.

(d) Qorshaha istraatijiyadeed ee Degmo/ Magaalo madax: (Urban Town/District Strategic Planning)-

Waa qorshe ifinaaya, Naqshadda dhuleed ee Magaalo ama Degmo, kaaso qeexaya, baahida mustaqballeed ee la xariirta kobcinta bulshada, barnamijyada lagu horumarinaayo, mashaaricda deegaameynta iyo qorshayasha dhaqan-dhaqaale ee heer degmo.

Aragtidaas iyo istratiijiyadaas waxaa lagu jaangoynayaa, xudduuda iyo baaxadda dhuleed ee u gaar ah magaaladaas ama degmadaas.

Naqshadeynta isticmaalka kala duwan ee dhulka, shuruudaha hagayaa dhul seereeynta, nidaamka iyo jaantusyada, waxA laga dhisayo goob walba, mashaariicda laga fulin doono gobolkaas, sidoo kale qaabeynta, muddada lagu fulinayo iyo kaalinta, dhinac walbaa ku leeyahay, laamaha dowladda ee u xilsaaran hirgalintiisa.

(e) Qorshe Faah-faahsan (Detailed Plan)

Waa qorshe fulineed iyo sharuudihii farsamo ee hagayay Jaantuska Dhismaha iyo barnaamijyada laga hirgelinaayo aag walba, sidoo kale isticmaalka dhuleed ee aasaasiga u ah mashruuc walba, kuna qeexan naqshadda guud ee magaalada/Degmada la guddoonsadey. Waxaana ku xusan dhammaan mashaariicda horumarineed iyo naqshadihii dhismo ee la xariiray. Dhulka mashaariicda loo qoondeeyay iyo goobta u gaartka ah, isku dubaridka iyo hirgelinta qorsheyashaas ku cad naqshadeynta guud ee magaalada iyo kaalinta dhinac walba ee laamaha dowladda.

(f) Qorsheynta Guud, Seereynta & Qeybinta isticmaalka kala duwan ee dhulka (Master Plan, Zoning and land division & land using)

Qorshaha guud ee qeybinta dhulka waxaa hagaya hadba baahida deegaan ee jirta, taasoo loo kala saaraayo aagag iyo naqshadeyn u kala baxaaya, Tusaale: dhul degsiimo (Residential), Dhul Ganacsi (Commercial and Industry) Dhulka danaha guud Sida dugsiyada, isbitaalada, beeraha nasashada, Dhismayaasha iyo Xarumaha Dowladda, Garoomada Cayaaraha iwm.

QODOBKA 4AAD
HORUMARINTA DHULKA SOOMAALIYEED & KHAYRAADKIISA

1. Sida uu tilmaamayo Qodobka 43^{aad} ee Dastuurka Federaalka; Dhulku waa khayraadka kowaad ee Soomaaliya iyo saldhigga nolol maalmeedka dadweynaha uu ka dhexeeyo.

2. Dhulka waa in loo haystaa, loo adeegsadaa, loona maamulaa si caddaalad ah, waxtar leh oo waxsoosaar waarana leh.

3. Dhammaan dadka ku nool Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, madax iyo shacab, shaqaale iyo ganacsade, waxaa waajib ku ah, ilaalinta iyo kobcinta Deegaanka iyo ka-qaybgalka horumarinta dalka, fulinta, maareynta, xannaanaynta Deegaanka iyo dhawrista kheyraadka dabiiciga ah ee dalka.

4. Dhammaan Dhulka JFS, waxaa mas'uul ka ah Dawladda Federaalka ee Soomaaliya, ayada oo ammaano ahaan ugu haynaysa dadka Jamhuuriyadda Soomaaliyeed, iyadoo ilaalinaysa danta gaar ahaaneed iyo danta guud, kana shaqeynaysa, kobcinta iyo horumarinta khayraadka Dhulka iyo sidii jiilasha hadda jira iyo jiilka danbe, uga munafacaadi lahaayeen khayraadka dhulka, isla markaana ay ugu

maamulayso, si hufan oo daahfuran, isu-dheelitirka danta guud iyo danta gaar ahaaneed, taabo-galinta hindisayaal saboolnimada lagu yareynayo, dajinta iyo hirgalinta qorsheyaal ku salaysan xaqsoor, cadddaalad, sinnaan iyo baxnaanada deegaanka.

5. Dajinta iyo diyaarinta qorshayaal lagu horumarinayo reer miiga iyo reer magaalka, abuurista hindisayaal gaar ah oo ku wajahan deegaameyn, dib-u-dajin iyo guriyeyn loogu fidiyo qeybaha bulshada ugu nugul, danyarta, barakacayaasha iyo qaxootiga Soomaaliyeed.

QODOBKA 5AAD
TILMAAMAHA GUUD EE HAGAYA HORUMARINTA DHULKA

1. Xukuumadda Federaalka (Wasaaradda Hawlaha Guud iyadoo la kaashaneysaa laamaha kale ee dowladda), waxay ku dhaqaaqeysa, wadatashi lagu dejininayo, Siyaasad jiheysa, nidaamisa Dhulka iyo horumarintiisa, sida uu tilmaamayo Dastuurku, faqradda 3aad ee qodobka 43-aad ee Dastuurka Federaalka. *"Xukuumaddu Federaalku waa inay dejiso siyaasad dhuleed oo heer qaran ah oo si joogto ah dib-ueegis loogu sameeyo".*

2. Wasaaradda Howlaha Guud, waxay dardar galineysaa, ku talaabsiga Jaangooynta, casriyeynta hannaanka shaqo iyo ururinta xogta Dhulka, diyaarinta, khariidaynta (mapping) iyo Naqshadaynta dhulka Jamhuuriyadda guud ahaan.

3. Dejinta Siyaasadda guud oo dhulka nidaamisa, casriyeynta sharuucda kala duwan ee nidaaminaya howlaha Dowladda Federaalka ee Soomaaliya, taasoo ku salaynaysa mabaadí'da ku tilmaaman faqradda-5aad ee Dastuurka Federaalka, qodobka 43-aad. *"Dawladda Federaalku iyadoo la tashaneysa Dawladaha xubinta ka ah Federaalka iyo ciddii kale oo ay quseyso, waxay dejineysaa siyaasadda dhulka iyo qaab lagu koontaroolo, laguna isticmaalo Dhulka".*

4. Xukuumadda Federaalka iyadoo la tashaneysa Dowladaha xubinta ka ah Dawladda Federaalka, waxay dejinaysaa Siyaasad guud oo hagta dib-u-dejinta iyo ilaalinta Deegaanka dhuleed ee Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya.

5. Wadaatashi iyo wax qaybsiga la xariira kheyraadka dabiiciga ah ee dhulka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaa ka wada xaajoon doona Dawladda Federaalka Soomaaliya iyo Dawlad goboleedyada Xubinaha ka ah Dawladda Federaalka Soomaaliya, iyadoo loo marayo qaab Dastuuri iyo oo waafaqsan shuruucda dalka, lagan qeyb galinayo wadatashiga, danbeyeyaasha iyo qeybaha kala duwan ee bulshada.

CUTUBKA 2AAD

QODOBKA 6AAD
GUDDIGA NAQSHADEYNTA DHULKA/MAGAALOOYINKA

1) Waxaa la dhisayaa guddi u xilsaaran, naqshadeynta dhulka Qaranka iyo horumarinta magaalooyinka Dalka oo tafatiran, si Dalku ula jaanqaado horumarka dunnida gaartay, isla markaana looga faa'iideysan karo, khayraadkiisa kala duwan ee dalku leeyahay.

2) Guddigu wuxuu yeelanayaa, shaqsiyad qanuuni ah oo guud, xaruntiisa waxay noqonaysaa, xarunta dhexe ee WHGD ay ku leedahay Caasimadda Dalka, wuxuu ku yeelanayaa Laamo dowlad gobolleedyada.

3) Guddigu waa Injineero iyo khubaro hoos taga wasaaradda Hawlaha guud, waxayna u xilsaaran yihiin maareyta naqshadeynta dhulka J.F.S.

4) Waxaa Howlaha farsamo iyo aqoonta gaarka ah, hormuud ka noqonaayo 15 Khabiiro oo ku xeel-dheer howlaha naqshadeynta magaalooyinka, xubnaha guddigaas 80% waxay ka imaandoonaan wasaaradda Hawlaha Guud, xubnaha khabiirada kale, waxaa laga qeby galinyaa laamaha kale ee dowladda iyo dhinacyada ku lug leh.

5) Waxaa aqoonta gaarka ee laga waayo dalka (Land and Ocean Scientific Fields), lagala kaashanayaa dalalka saaxiibka la ah Soomaaliya. Sidoo kale wixii loo baahdo waxaa lala kaashan karaa cidii mudan, shaqaaleysinta khubaro shisheeye iyo la taliyayaal gaar ah, xeel-dheerayaal la qorto, si loo daboolo baahida, khibradaha iyo culuumta dalka ka maqan. Inta ay shaqeynayaan khabiiradaasa, waxaa, wax la soo barayaa, shaqaale Soomaaliyeed oo loo soo diyaariyey shaqooyinka, ka hoos shaqeeyaan ilaa ay mas'uuliyada kala wareegi karaan ama kaalintaas buuxin karaan.

6) Xulitaanka iyo Magacaabista Xubnaha Guddigaas, qeybaha ay ka kooban yihiin, waxaa soo jeedinaya wasiirka wasaaradda HG, xeer gaar ah iyo qorshe howleed ayaa nidaamin doona shaqadooda, golaha wasiirada iyo golaha shacabka ansixintooda ka dib, magacaabistoodu waxay ku soo bixi doontaa Xeer Madaxweyne iyo faafinta rasmiga ah.

QODOB 7AAD
WAAJIBAADKA SHAQO EE GUDDIGA NAQSHADEYNTA

1. Waajibaadka guud ee shaqo iyo Howlaha farsamo ee golahan loo idmadey, wuxuu noqonayaa:
   A) Iney laamaha dowlada taageero farsamo iyo aqoon ku biiriyaan.
   B) iney isku dabaridaan qorshe horumarineed oo taxane ah, oo lagu daboolo baahida dalka ee ka dhalatey dhib u dhicii bur-burka, loona dejiyo qorshe gaaban (5-Sano & muddada-dheer ee mustaqbalka).
   C) Jihaynta qorshaha dib u dhiska Dalka oo ay WHGD hogaaminayso Iyadoo lala kaashanaayo dhammaan dhinacyada ay khuseyso.
   D) Jaangoynta iyo kala qorsheynta dhulka Danta guud iyo Waafijinta Naqshadda guud ee magaalooyinka
   E) Qaabeynta Siyaasadda guud ee nadaaminayo laguna hormarinaayo howlaha naqshadeynta Dalka iyo is dhexgalka gobollada Dalka iyo ku xiranka mashaariicda waaweyn ee Qaaradda, (*SDG 2030 and AU-Regional integration infrastructure framework 2063)*.
   F) Diyaarinta jaantusyo iyo tusmooyin farsamo (Standards and Technical guidelines), dib u soo nooleynta xarumo casri ah oo lagu keydiyo loona casriyeeyo naqshadaha Dalka (detailed mappng).
   G) Soo-jeedin, ra'iyi iyo talasiinta WHGD iyo laamaheeda si loo habeeyo mashaariicda la xariirta nidaaminta iyo dhisidda magaalooyinka.

QODOBKA 8AAD
NIDAAMINTA DHULKA IYO NAQSHADDA GUUD EE MAGAALOOYINKA
(MASTER PLAN)

1. Xafiiska naqshadaha ee Wasaaradda Hawlaha guud & Guriyeynta iyo guddiga naqshadaha Qaranka, waxay dhulka magaalooyinka u sameeynayaan naqshad guud (**Master Plan),** oo lagu muujinaayo Dhulka iyo isticmaalka loogu talo galay aag/goob walba.

2. Tirsi iyo midabo kala duwan ayaa nidaaminaya Dhulka magaalooyinka, dhismaha kala duwan, waxaa nidaaminaya afgarad farsmo oo u gaar ah dhismaha (building codes)

3. Tirsi iyo xuruuf la soo gaabiyey ayaa nidaamiyey jidadka kala duwan ee magaalooyinka, siyaasad u gaar ah ay nidaamin doonta magacyada jidadka iyo hannaanka u gaarka ah tirsiga jidadka iyo midabada la xariira.

QODOBKA 9AAD
SEEROOYTA DHULKA MAGAALOOYINKA IYO QEYBAHOODA KALA DUWAN

1. Qeybinta Guud ee dhulku iyo seereyntu (land zoning) waxay u kala baxayaan tusaale ahaan sidan so socota:-
   1.1. Dhul Degsiimo (Resedential).
   1.2. Dhul Warshadeed & Xirfado (Industrial & Artisanal Handcraft).
   1.3. Dhul Ganacsiga (Commercial).
   1.4. Danta/Danaha Guud (public purpose)
   1.5. Dhul loo seereeyey Waddooyinka
   1.6. = = Dugsiyada waxbarasho & Jaamacadaha
   1.7. = = Jardiinooyinka & goobaha nasashada
   1.8. = = Barxaddaha Gaadiidka La Dhigto (Parking Area)
   1.9. = = Xarumaha adeegayada Caafimaadka
   1.10. = = Xarumaha & Xafiisyada Dawladda
   1.11. = = Garoomada Ciyaaraha & xarumaha isboortiga
   1.12. = = Saldhigyada Booliiska / Xabsiyada IWM.
   1.13. = = Xeryaha Ciidammada qalabka sida.
   1.14. = = Musaajiddada iyo Goobaha Cibaadada
   1.15. = = Qabuuraha/Xabaalah
   1.16. = = Maxkamadaha iyo goobaha Garsoorka

2. Waxa kale oo isla naqshadda lagu muujinayaa goobaha hawlaha addeegga lagama maarmaanka u ah nolosha bulshada, sida:-
   a. Naqshad muujinaysa marinka xarkaha korantada.
   b. Naqshad muujinaysa marinka xarkaha telefoonada.
   c. Naqshad muujinaysa isgaarsiinta iyo laliska telefoonada.
   d. Naqshad muujinaysa isgaarsiinta & xarkaha badweynta (internetka).
   e. Naqshad muujinaysa biyo galinta iyo tuunbooyinka.
   f. Naqshad muujinaysa marinka bulaacadaha.
   g. Naqshad muujinaysa marinka xarkaha telefoonada
   h. Naqshad muujinaysa jidadka iyo wadooyinka magaalooyinka

QODOBKA 10AAD
MUDDADA DIB-U-EEGISTA NAQSHADEYNTA MAGAALOOYINKA

1. Naqshadeynta Magaal waxaa 5sanno dib ayaa loo eegayaa, waxayna barbar soconayaa Qorshaha Horumarinta Qaranka (NDP) (5 years Mid Term Plan (YMTP).

2. Waxaa waajib ah in dhulka deegaanka dadweynaha (Residential) ee la qorshaynayo loogu talo galo cabirka guud ee dhulka 30% ugu yaraan dhul loo isticmaalo danaha guud ee ku sheegan faqradda 1-aad ee qoddobkan.

QODOBKA 11AAD

NIDAAMKA FARSAMO EE HAGAYA NAQASHADEYNTA MAGAALOOYINKA JAMHUURIYADDA, XAYNDAABKA HAGAYA DHISMAHA IYO MAAMULKA DHULKA

(MASTER URBAN REGULATORY FRAMEWORK & BUILDING CODE)

1. Howlaha adeegyada bulshada Soomaaliyeed dhinaca farsamada ee isticmaalka dhulka iyo qaabka hagaya dhismayaasha waxaa lagu nidaamiyey tusmeeyaha farsamo ee habsami-u-socodka dhismaha magaalooyinka wuxuu qaabeynayaa howlaha farsamo ee kala duwan ee la xariira dhismaha Dhulka oo dhan.

2. Nidaamiyaha Dhismaha Magaalooyinka Dalka ee lagu ansixinayo sharcigan wuxuu qaabeynayaa dhammaan Adeegyada guud ee Dalka oo dhan dhinaca farsamadda iyo dhammaan howlaha Wasaaradaha Dalka u xilsaaran dib-u-dhiska kaabayaasha dhaqaalaha Dalka oo Wasaaradda howlaha guud ay hormuud ugu tahay Qaranka, heer Federaal, heer dowlad gobolleed iyo heer degmo iyo magaalo.

3. Nidaamiyaha Magaalooyinka wuxuu nidaaminayaa cabiraadaha Dhulka iyo heer beegyada/jaantusyada dhismaha (building codes & standards), wuxuu qaabeynayaa dhul qeybinta iyo hannaanka seereynta Dhulka danta guud iyo dhammaan qeybaha danta gaarka ah, dhismaha kaabayaasha dhaqaale ee dalka.

4. Wuxuu nidaaminayaa isdhexgalka Dhulka iyo Dadka, qaabeynta kaabayaasha dhaqaale, tixraaca laga eeganayo naqshadeynta magaalooyinka iyo guud ahaan Dalka.

5. Wuxuu fududeynayaa iskudabaridka howlaha kala duwan ee la xiriira dibudhiska Dalka iyo naqshadeynta Dalka, isku-xirka iyo isdhexgalka gobollada Dalka iyo dowladaha xubnaha ka ah dowladda Federaalka, dardar galinta howlaha la xiriira mashaariicda waaweyn ee Qaranka ku xiraya ganacsiga dunnida iyo kan Qaaradda Afrika bad iyo berri (Trans-Africa).

QODOBKA 12AAD
JOOGTUSYADA HAGAYA DHISMAHA MAGAALOOYINKA

1. Joogtusyo/Heerbeegyo farsmo (Techical Standard) oo nidaaminayaa cimilada iyo baahida nololeed ee gobolada dalka, waxaa si gaar ah u leh wasaarado kala duwan ee adeeg walba hormuud ka ah.

2. Joogtusyadaas/Heerbeegyadaas waxay si tafaftiran u faahfaahinayaan dhammaan hawlaha farsho ee dhisma walbo iyo hanaanka iyo tayada agabka wax lagu dhisayo.

3. Laamaha dowladda iyo wasaaraddaha iska leh si gaar ah Joogtusyo nidaamiya dhismayaashooda, waxaa ka mid ah:-

    a. **Wasaarada Waxbarashada iyo Barbaarinta** waxay si gaar ah u leedahay joogtusyo (standards) nidaamiya, dhismaha dugsiyada waxbarashada, daaqadaha iyo qolalalka waxbarashada cabiro u gaar ah ayey leeyihiin.
    b. Joogtusyada xarumaha waxbarashada dalku way kala duwan yihiin, waxaa lagu saleeyey joogtusyada dhismaha, cimilada ka jirta deegaan walba.
    c. **Wasaaradda Caafimaadka** waxay leedahay joogtusyo kala duwan oo u gaar ah.
    d. **Wasaaradda Arrimaha Gudaha / Wasaaradda Garsoorka/ Wasaaradda Amniga Qaranka** waxay leeyihiin, joogtusyo u gaar ah oo nidaamiya saldhigyada booliska iyo dhismooyinka dabni barista, xabsiyada iyo jeelasha.

QODOBKA 13AAD
DIB-U-NAQSHADAYNTA MAGAALOOYINKA

4. Magaalooyinka Dalka guud ahaan ama qeybo ka mid ah, dib ayaa loo naqshadeynayaa, waxaa barbar soconayaa talaabooyin lagu casriyeeynayo hanaanka maamul iyo howlaha farsamo ee Jamhuuriyadda Federaalka.

5. Dib-u-naqshadeynta Magaalooyinka dalka, (Re-Planning of town-ship) waxa laga hormarinayaa cilmi-baaris kala duwan oo loogu kuur galaayo

xaaladaha kala duwan ee deegaanada dalka ka jirta, ilaalinta bilicda magaalooyinka waxaa barbar soconayaa ilaalinta xuquuqda bulshada iyo karaamada aadamaha, waxaana la beegsanayaa mabaadi'da xukunka wanaaga isdhexgalka bulshada iyo himilooyinka Horumarinta waraa ee SDG.

6. Waxaa Dib-u-naqshadeynta lagu tixgaliyaa, xaaladaha nololeed ee bulshada, duruufaha iyo baahiyaha gaarka ah, waxaa il-gaar lagu eegayaa naafada, barakacayaasha, dan yarta.

7. Guddida Qaranka ee naqshaduhu markuu ka helo duqa magaalo codsi dib u naqshadayn magaalo (Re-Planning of town-ship) ama qaybo ka mida ah ama uu arko inay lagama maarmaan tahay in loo sameeyo dib-u-naqshadayn sida jidad balaadhin, dib u habayn cabirka jagooyinka degsiimo, raris xeryo ciidan ama xarumo dawladeed IWM, wuxuu oggolaanayaa ina la sameeyo dib u naqshadayn

8. Guddiga Qaranka ee naqshadaynta markay amarto Xafiiska naqshadaynta ee Wasaarada Hawlaha Guud samaynta dib u naqshadaynta, duqa magaalada waxa uu ku baahinayaa wargeysyada iyo idaacadaha amarka mamnuucida dhisme cusub iyo dhamaystirka dhisme hore qabyo u ahaa iyo degida dhul cusub gabi ahaanba, muddada la dhamaynayo samaynta naqshada cusub.

9. Duqa Magaaladu waxa uu ku wargelinayaa dadka ay dib-u-naqshadayntu saamaynta ku yeelatay muddo saddex bilood gudahood ah.

10. Qiimaynta hantida iyo bixinta mag-dhawga hantida dib u naqshadayntu saamaysay waxa u xilsaaran Guddiga Naqshadaynta Guud.

QODOBKA 14AAD

FIDITAANKA MAGAALOOYINKA & TALAABOOYINKA KA HORTAGA AH

1. Ma dhaafi karto naqshadeynta dhulka magaalo, qiyaas dhan 5km oo ka baxsan kolba halka dhismuhu joogo. Si joogta ah ayaa loo fidinayaa waxaana lagu saleynayaa, hadba baahida markaas jirta.

2. Wasaaradaha iyo Laamaha dowladda ee ku shaqada leh arrimaha Dhulka iyo Magaalooyinka, waa inay ka shaqeynyaa, sidii loo horumarin lahaa, loona qaabeyn lahaa, adeegyada kala duwan

ee bulshada, laguna fidin lahaa, Magaalooyinka dalka oo dhan, heerarkooda kala duwan.

3. Fiditaanka Magaalooyinka dalka ee ku yaala deegaanada kala duwan, waxaa la hubinyaa baahiyaha aasaasiga ah ee bulshada, waxaa la sahaminayaa biyaha laga heli karo deegaan walba iyo sida biyo ku filan loogu heli karo, fiditaanka magaalyoonka iyo bulshada ku nool.

4. Fididaanka Magaalooyinka waxaa kaalin weyn ka qaadanay jaangooyntooda hubinta baahiyahaa kala duwan, si loo hirgaliyo himilooyinka horumarka waara (SDG – Sustainbli cities).

QODOBKA 15AAD

DIIWAANGELINTA DHULKA & DIB-U-HABEYNTA DIIWAANKA GUUD EE DHULKA

1. Waxaa dib loo habeynaa, shuruucdii nidaamineysay diwaanka Dhulka (Cadastral) iyo arrimihii farsamo ee la xiriiray, taasoo lala jaanqaadayo horumarka dunidu gaartay, tiigsashada tiknaloojiyada kala duwan ee la xiriirta naqshadeynta qeybaheeda kala duwan, iyadoo laga anba qaadayo, tilmaamaha dastuurka federaalka Qod. 43aad.

2. Waxaa shardi ah in la xafido lana casriyeeyo, hannaanka shaqo iyo diiwaanka lagu qoro xuquuqda ee loo yaqaan (Cadastral), kuna saabsan, dhulka ay maamulayso waaxda Damaanyo ee Wasaaradda Hawlaha Guud. Sida ku cad, tilmaamaha dastuurka federaalka Qod. 43aad, faqradda 3aad, xarafka, b, c, d, e, ilaa xarafka f.

3. Qoraallada la gelinayo diiwaanka waa inay ku salaysnaadaan xeerarka uu qorayo sharcigan, waana inay ahaadaan kuwa looga faaiidaysto lahaanshaha dhulka sida ugu fiican.

4. Dib-habeynta iyo dib-u-dejinta (guiding policies) siyaasadaha kala duwan ee hagaya dalka ee ku aadan Dhulka (land policy), guryaha (housing Policy), dhismaha, qorsheynta ((constraction planning policies), sidoo kale, dajinta shuruuca la xiriirtay.

5. Qabanqaabinta la tashiyo ku aadan dib-u-eegista dhammaan, shuruucdi ay ku shaqeyn jirtay Wasaaradda Hawlaha Guud, si loo waafajiyo, isbedelka ka jira dalka iyo nidaamka Federaaliga ah ee dalku qaatay.

QABYO-QORAAL-DRAFT

CUTUBKA 3AAD

QODOBKA 16 AAD

HANNAANKA DIWAAN GALINTA XIRFADLEYAASHA SHIRKADAHA DHISMAHA

1. Hannaanka hindise sharciyeedkan ayaa nidaaminaya nidaaminaya diiwaan gelinta Xirfadleyaasha Shirkadaha dhismaha.
2. Wasaaraddu kadib markay hubsato jiritaanka shirkadda doonaysa in la diiwaan geliyo waxay siinaysaa form si ay u soo buuxsato shirkadda kaasoo ay ku xusan yihiin shuruudaha diiwaan gelinta waxaana ka mid ah :-

   a) Magaca shirkadda
   b) Qaab-dhismeeka & Mas'uulka madaxda ka ah shirkadda
   c) Xogkoobaha shirkada (Profileka shirkadda)
   d) Milkiilayaasha iyo falaadh/sahamka ay kala leeyihiin, raasmaalka shirkada oo nootaayo laga soo cadeeyey.
   e) Cinwaanka (Addresska) shirkada lagala soo xiriirayo I.w.m
   f) Khidmada iyo qiimaha diwaan talinta, waxay ku cadahay jadwalka iyo lifaaqa sharcigan.

QAYBTA 17AAD

GUDDIGA AASAASIDDA GUDDIGA XIRFADLEYAASHA SHIRKADAHA DHISMAHA

1. Halkan waxaa lagu aasaasay Guddi lagu macaabo Guddiga Horumarinta Xirfadleyaasha Shirkadaha dhismaha.

   1.1. Gudigu waa in uu:

   a) Noqdaa hay'ad leh jiritaan dhab ah isla markaana leh Saxiix iyo Calaamad u gaar ah;
   b) In magaca hay'adda lagu dacweyn karo iyaduna ay wax ku dacweyn karto;
   c) Ayadoo la ilaalinayo hadafka ama waxa la xariira hadafka Xeerkaan, guddigu wuxuu yeelanayaa xeer hoosaad nidaamiya una fududeeya habsami u socodka shaqadooda.

2. Guddigu qaabdhismeed u gaar ah ayuu yeelanayaa, qaybaha, noocyada iyo heerarka/dabaqaadka Xirfadleyaasha Shirkadaha dhismaha sida ku cad lifaaq 2aad.

QODOBKA 18AAD
SHAQADA GUDDIGA

Marka loo hoggaansamo shuruudaha xeerkan iyo xeer-nidaamiyaha hoos yimaada, shaqada guddigu waxey noqoneysaa:-

1. Tixgalinta talooyinka farsamo, meelmarinta go'aamadda iyo Codsiyada Diiwaangelinta Xirfadleyaasha Shirkadaha dhismaha; ku caddeynta diiwaanka Xirfadleyaasha Shirkadaha dhismaha iyo waliba jaangoynta lacagta diiwaan galinta iyo kharashka sanadlaha ah ee ku cad Lifaaqa 2aad.

2. Nidaaminta hawl qabadka iyo hab dhaqanka Xirfadleyaasha Shirkadaha dhismaha;

3. Hubinta, Gelidda iyo kormeeridda meelkasta oo ay ka socoto shaqo Dhismo, rakibaad, taagis ama baddelid si ay u xaqiijiyaan una hubiyaan in shaqadda ay wadaan Xirfadleyaasha Shirkadaha dhismaha diiwaan geshan ay waafaqsan tahay Nidaamka & Joogtusyada (standards) Hagaya dhismaha dalka iyo ilaalinta tilmaamaha Xeerarka dalka;

4. Ka qaadidda tallaabo sharciga waafaqsan Xirfadleyaasha Shirkadaha Dhismaha qabata shaqo dhisme; rakibaad, taagid ama badelid ayadoon diiwaangashneyn,

5. Xaqiijinta iyo hubinta in meel kasta oo lagu hayo shaqo dhismo; rakibaad, taagid ama baddelid, ay leedahay boor (Tabeelle) ku tusinaya magacyada iyo cinwaanka mashruuca, macaamiisha, lataliyaasha iyo Xirfadleyaasha Shirkadaha Dhismaha mashruuca; iyo ka qaadidda tallaabo sharciga waafaqsan ciddii aan fullin shuruudahaas;

6. Kor u qaadidda iyo raadinta fursado iyo qalab wax barasho iyo fulinta tababaro loogu tala galey maareynta heshiiska ka hor iyo ka dib iyo dhisidda, taagidda, rakibaadda ama badelidda qaababka iyo wax kasta oo laxiriira;

7. Kor u qaadidda iyo ilaalinta xirfadda iyo sharafta Xirfadleyaasha Shirkadaha Dhismaha;

8. La talinta Xirfadleyaasha Shirkadaha Dhismaha dhinaca maamulka iyo farsamada;

9. Isku xiridda iyo la shaqeyta guddiyada xirfadleyda gudaha, kuwa caalimiga ah iyo ururada ka shaqeeya dhismaha;

10. Hubinta in dhammaan goobaha dhismaha la dhawrey; iyo in loo hoggaansamay xeerarka shaqaalaha caafimaadka, badqabkooda, habsami u socodka shaqada iyo shuruucda badbaadada goobaha/dhismaha warshadaha gudahooda.

11. Dib u eegista Xirfadleyaasha Shirkadaha Dhismaha diiwaangeshan iyo eegista in ay buuxiyeen shuruudaha diiwangelinta marka la eego nooca iyo dabaqada ay ka tirsanyihiin.

12. Tixgelinta faafinta codsiyada heshiisyo khaas ah oo ay macaamiishu dalbanayan ayagoo ku hadlaya magaca Xirfadleyaasha Shirkadaha dhismaha diiwaan gashan.

13. Ka qaadista tallaabo anshaxa waafaqsan Xirfadleyaasha Shirkadaha dhismaha diiwan-geshan ee jabiyey shuruudaha sharcigan ama xeer hoosaadka guddiga;

14. Qabashda shaqooyinka kale ee la xiriira danta dadweynaha iyo shaqooyinka wasiirku uu qoraal ahaan ku amro;

QODOBKA 19AAD
XADDI-DAADDA MAS'UULIYADDA

Xubin ka tirsan guddiga dusha lagama saari karo mas'uuliyada khalad ka dhacay ama masuuliyad uu ka gaabiyay asagoo ay ka tahay niyad- sami iyo wax-wanaajin.

QODOBKA 20AAD
GUDDOOMIYAHA GUDDIGA AHNA DIIWAAN GELIYAHA

1. Guddoomiyaha Guddiga Horumarinta Xirfadleyaasha Shirkadaha Dhismaha dalka wuxuu noqonaya Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Hawlaha Guud iyo Guriyeynta heer federal.

2. Guddoomiyaha Guddiga Horumarinta Xirfadleyaasha Shirkadaha Dhismaha wuxuu noqonaya Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Hawlaha Guud ee heer dowlad goboleed.

3. Guddoomiyaha Guddiga wuxuu diiwaan geliyaha una saxiixayaa shahaadooyinka diiwaangelinta Xirfadleyaasha Shirkadaha Dhismaha kala duwan.

4. Diiwan geliyuhu wuxuu hoos imaanayaa, xogtana u gudbinayaa Wasiirka.

QODOBKA 21AAD

XANNIBIDDA U GANACSIGA SIDII XIRFADLEYAASHA SHIRKADAHA DHISMAHA

ISTICMAALIDDA CADDAYNTA IYO NATIIJADA DIIWAANGALINTA

Xirfadleyaasha Shirkadaha dhismaha oo magacooda la galiyey diiwaanka ilaa inta magaciisu kujiro diiwaanka, waa inuu ogolaadaa inuu u aqbalo qaabka iyo nooca "Xirfadleyaasha Shirkadaha dhismaha diiwaan gashan" sida uu yahay ee guddigu ay ogolaadeen.

QAYBTA 22AAD
XANNIBIDDA U GANACSIGA SIDII XIRFADLEYAASHA SHIRKADAHA DHISMAHA OO KALE

KA XANIBAAD INUU SAMAYSTO GANACSI XIRFADLEYAASHA SHIRKADAHA DHISMAHA AHAAN

1) Qofk kasta ama shirkad kasta, taasoo
    a) Si khaldan iskaga dhigta Xirfadleyaasha Shirkadaha dhismaha diiwaan gashan inuu yahay, ama
    b) Isaga oo aan u qalmin sida ku xusan qaybta 2-aad, in uu isticmaalo hab ama magac Xirfadleyaasha Shirkadaha dhismaha diiwaan gashan ama magac, nooc ama xaaladaha laga dheehan karo qofkasi inuu yahay qof diiwaan gashan.
    c) Isaga oo aan ahayn Xirfadleyaasha Shirkadaha dhismaha diiwaan gashan, inu uu iska dhigo si toosa ama si dadban inu inuu yahay Xirfadleyaasha Shirkadaha dhismaha aqoon iyo khibrad leh, hadii uusan hadafkiisu ahayn inuu markaas is diiwaan galiyo.
    d) Isaga oo aan ahayn Xirfadleyaasha Shirkadaha dhismaha diiwaan gashan uu ka fuliyo ganacsi gudaha Jamhuuriyadda Federaalka qandaraasle ahaan, waa danbiile markii la xukumana waxaa ku waajibaya ganaax kaas oo aan ka badnayn boqolkiiba toban ee wadarta heshiiska ama mashruuca laakiin aan ka yarayn boqolkiiba hal 1% ee wadarta qiimaha ama mashruuc la fuliyey ama mid gacanta lagu hayo ama $1000 kun doolar oo lacagta maraykanka ah hadba tii badan ama xarig mudo aan ka yarayn saddex sanadod ama in la iskugu daro xarig iyo ganaax labadaba.

2) Qof kasta oo ku ganacsada magac, cinwaan, ama hab leh kalmado ama jumlooyin ku tusinaya " Xirfadleyaasha Shirkadaha dhismaha

diiwaangashan" haddii uusan ahayn mid Xeerkan gudihiisa lagu diiwan gashay, Xirfadleyaasha Shirkadaha dhismaha, wuxuu ku sifoobayaa ama uu galayaa danbi.

3) Markuu ku cadaado ama la xukumo waxaa ku waajibaya ganaax aan ka badnayn 10% boqolkiiba toban wadarta heshiiska ama qaymaha mashruuca ee heshiis la qabtay ama mid gacanta lagu hayo ama $1500 kun iyo shan boqol oo lacagta maraykanka ah hadba kii labadoda badan ama xabsi aan ka yarayn muddo shan sano ah ama in la iskugu daro xabsi iyo ganaax labadaba.

QODOBKA 23AAD
SHAQSIYAADKA URURADA KA TIRSAN EE U SHAQEEYA SIDII XIRFADLEYAASHA SHIRKADAHA DHISMAHA

1) Ma jiri karo urur, ha ahaado mid ganacsi loogu tala galay ama mid aan loogu tala galin, kaas oo ka qeyb gali kara ganacsiga Xirfadleyaasha Shirkadaha dhismaha hadduusan, ugu yaraan, mid ka mid ah dadka wada hawlgala, ama wadaha leh, ama agaasimayaasha kuwaas oo wada shaqayn leh, sida guddigu caddeeyay farsamooyinka, xirfadaha iyo khibrado lagama maarmaanka u ah, si uu hab lagu qanci karo uu u filiyo waajibaadka isaga saaran, ama shirkaddiisa laga filayo, ama laga dalbaday in uu qabto, sida Xirfadleyaasha Shirkadaha dhismaha ka tirsan dabaqadda, ama nooca ay dooneyso in ay ka mid noqoto; qofkaasna uu yahay mid diiwaan gashan.

2) Marka uu dhinto agaasime kaas oo sido kale saamile ah yaqaannana farsamooyinka, xirfadaha iyo khibradda looga baahanyahay, kaas oo ka tirsan urur ganacsi ama urur kale oo u shaqaynaya sidii Xirfadleyaasha Shirkadaha dhismaha, ururkaas ama dadkaas haddii shuruudaha lagu sheegay faqrada 1-aad aysan ka hor imaanayn waxaa loo ogolaan karaa inuu dhammeeyo mashruuca uu hayo kaliya marka cidda matalaysa ay yihiin Xirfadleyaasha Shirkadaha dhismaha diiwaan gashan.

3) Majiro qodob ka mida Xeerkan oo loo fasiranayo inuu siinayso ama u ogolaanayso cidkasta, ha ahaado ganacsade ama yuusan ahane, in loo diiwaan galiyo ama awood loosiiyo diiwaan galiyaha inuu u diiwaan galiyo cidkasta sidii Xirfadleyaasha Shirkadaha dhismaha diiwaan gashan.

4) Urur ganacsi ama mid kale marka uu buuxiyo shuruudaha diiwaan galinta waxaa loo diiwaan galin kara Xirfadleyaasha Shirkadaha dhismaha ahaan haddii la diiwaangaliyana waxuu si sharci ah u qabsan karaa shaqadiisa sidii Xirfadleyaasha Shirkadaha dhismaha diiwaan gashan iyo, haddii ururkaas la diiwaan galiyey ama soo codsaday in la diiwaan galiyo uu ka tixraacay Xeerkan farsamooyinka, khibrada, xirfada, iyo akhlaaqda looga bahan yahay sida guddigu uu ugu cadeyey Xirfadleyaasha Shirkadaha dhismaha ama codsade kasta inuu u fasirto tixraac ahaan Xeerkan marka la eego farsamooyinka,khibradda, xirfadda iyo akhlaaqda looga bahan yahay dadka ah agaasimayal ama samilayaal,siday tahayba ama dad la shaqalaysiyey, ururkaas oo ka qayb qaadanaya, ama haddii uu codsade yahay ka qayb qaadan doona, dhaq-dhaqaqyada ururka marka uu shaqadiisa wato Xirfadleyaasha Shirkadaha dhismaha diiwaan gashan.

5) Guddigu wuu diidi karaa in loo diiwaan galiyo urur kasta Xirfadleyaasha Shirkadaha dhismaha ama wuxuu amri karaa in laga saaro diiwaanka magaca Xirfadleyaasha Shirkadaha dhismaha diiwaangashanaa, haddii ay u caddaato in laga waayey hal mid oo ka mid ah agasimayaasha ama saamilayaasha qof haddii uu soo codsado in uu noqdo Xirfadleyaasha Shirkadaha dhismaha la diiwaangaliyey la aqabali lahaa ayadoo la eegayo awooddiisa shakhsiyeed.

6) Urur kasta oo qabanaya Xirfadleyaasha Shirkadaha dhismaha shaqo ka hor imaanaysa mid ka mid ah shuruudaha Qodobkan waa danbiile xarig muteysan kara ama ganaax kaliya. Ganaaxu waa inaanu ka badan 5% boqolkiiba shan wadarta qiimaha mashruuca uu heshiiska ku galay, ama xabsi muddadiisu ka yareyn saddex sano ama ganaax iyo xabsi labadaba.

QODOBKA 24AAD

QEEXIDDA "QABASHADA GANACSI' AMA 'U GANACSIGA" SIDA XIRFADLEYAASHA SHIRKADAHA DHISMAHA

Marka loo eego hadafka Xeerkaan waxaa lagu tilmaami karaa qof in uu u ganacsanayo ama uu u shaqeynayo sidii Xirfadleyaasha Shirkadaha dhismaha haddii uu doonayo in uu usoo bandhigo ama siiyo qof kale adeeg Xirfadleyaasha Shirkadaha dhismaha taas oo danta uu ka leeyahay ay tahay in uu ka helo baddal qiimo leh ama abaal marin, haddii ay adeegyadaas loo soo bandhigay ama loo bixiyay si waafaqsan heshiis shaqo, heshiis adeeg, heshiis loogu tala galay adeegyo ama si kale.

QODOBKA 25AAD
TALAABOOYINKA & WAXYAABO KA REEBAN

Cid kasta iyo Qofkasta oo:

a) Ku sifowda ama ku talaabsata xadgudub iyo sharci daro ama sababta arrin waxyeelo geysata ama oggolaata in la galiyo diiwaanka qoraal aan jirin ama aan saxnayn ama nuqul kata oo laga sameeyo;

b) Si khiyaamo ah ku helay ama isku dayay in uu ku helo naftiisa ha u rabo ama qof kalee, diwaanka Dhulka, diiwaanka Xirfadleyaasha Shirkadaha dhismaha ama rukhsada ganacsiga Xirfadleyaasha Shirkadaha dhismaha; ama

c) Si ogaal ah ama ula kac ah u sameeyo warbixin khaldan oo ku saabsan shay khaas ah, oo loogu tala galay marin habaabin si looga helo Xeerkan faa'iido, tanaasul ama mudnaan, ha u rabo naftiisa ama qofkale, waa danbiile waxaana lagu ciqaabayaa ganaax aan ka badneyn $600 lix boqol oo doollarka Mareykanka ah laakiin aan ka yareyn $300 saddex boqol oo doolarka Mareykanka ah ama xabsi aan ka yareyn labo sano ama ganaax iyo xabsi labadaba.

QODOBKA 26AAD
FAA'IDOOYINKA

1) Xirfadleyaasha Shirkadaha dhismaha oo la diiwaan galiyay waxaa laga filayaa uuna ku khasbanyahay in uu la yimaado qaddarka uu doonayo in u faa'iido, kaas oo laga rabo in u noqdo mid macaquul ah aanan la xiriirin qodob ka soo horjeeda sharci kasta ama xeer hoosaad kasta oo uu leeyahay bulsho, shirkad ama urur kasta oo uu ka tirsan yahay.

2) Qodob kasta oo ka tirsan sharci ama xeer-hoosaad kasta oo ay leedahay bulsho, shirkad, ama urur Xirfadleyaasha Shirkadaha dhismaha ah, kaas oo la diiwaan geliyay ama la helay, oo qaddarka ugu yar uu faa'idayo oo uu soo bandhigay uu ka badan yahay qadarka guddigu u arko in ay ku habboon tahay adeegga uu bixiyay Xirfadleyaasha Shirkadaha dhismaha, kaas oo xubin ka ah ururka, kuma khasbi karo qofkaas arrin la xiriirta adeegga uu ku bixiyay gudaha Jamhuuriyadda Federaalka; mana jirto xubin u isticmaali karta qodobkaas si uu ugu noqdo asal sheegashada qadar faa'iido oo ka badan qaddarka guddigu ogolaaday, amar ku bixiyay, ansixiyay ama uu u arko in ay ku habboon tahay, ama ay amar ku bixiyeen dhex-dhexaadiye-yaal ama ay ogolaadeen xubnaha uu ka dhexeeyo is qabsi la xiriira qaddarka ugu yare ee faa'iidada.

QODOBKA 27AAD
XEER HOOSAADKA GUDDIGA

1) Guddigu haddii uu wasiirku u ogolaado wuxuu sameyn karaa xeer hoosaadyo si uu shaqooyinkiisa iyo ahadaaftiisa uu si fiican u gaaro, iyo ayadoo uusaan ka hor imaaneyn ujeedka guud ee xeerkaan, waxeyna sameyn karaan:
    a) Dejinta nidaamka dhaqanka iyo akhlaaqda laga rabo Xirfadleyaasha Shirkadaha dhismaha;
    b) Kala sarraysiinta, kala saaridda iyo caddeynta qeybaha Xirfadleyaasha Shirkadaha dhismaha;
    c) Dejinta xudduuda u kala dhexeysa dabaqdaha iyo noocyada kala duwan e Xirfadleyaasha Shirkadaha dhismaha;
    d) Dejinta shuruudaha loo baahan yahay si loo helo u qalmidda in laga mid noqdo dabaqad la yaqaan;
    e) Goynta lacagaha looga baahan yahay codsiga, diiwaangelinta iyo tan sanadlaha ah, arrinta la xiriirta shahaadada diiwaan gelinta iyo ka saaridda, nuqullada iyo liisaska ama arin la xiriirta qoraallada diiwaanada;
    f) Tala ka bixinta qaddarka faa'iidada ee macaquulka ah kaas oo uu Xirfadleyaasha Shirkadaha dhismaha qandaraasluhu ku darsan karo heshiiskiisa ama adeegga uu bixiyey;
    g) Kala saaridda ciddii is qabata kuwaas oo dhex-dhexaadiye-yaashii loo saarey ay ku guul dareysteen;
    h) Dejinta shahadooyinka, abaal marinta iyo aqoonta loo aqoonsanayo cidda ku diiwaan gashan gudaha sharcigan in ay u qalanto;
    i) Dejinta shahaadooyinka iyo abaal-marinnada kale oo giddgu qiray ama ansixiyay;
    j) Dejinta lacagaha ogolaanshaha maaddo
    k) Qabashada dhex-dhexaadinta xubnaha muranku u dhexeeyo kuwaas oo heshiiskoodu uu ku xirayo guddigu in uu dhexdhexaadiyo;
    l) Dejinta shuruudaha loo baahan yahay si loo horumariyo dabaqadaha Xirfadleyaasha Shirkadaha dhismaha;
    m) Qiimeynta shahaadooyinka, dibloomooyinka, digriiyada iyo warqadda darjooyinka, sababtuna ay tahay si loo ogaado in shahaadooyinka, dibloomooyinkaas, digiriiyadaas iyo warqadaa darjooyinka ay buuxiyeen shuruudaha ugu yar ee looga baahan yahay.

QODOBKA 28AAD
DHIIRIGALINTA DADAALADA DALKA LAGU HORUMARINAYO

1. Siyaasadda dowladuu waxay dhiirigalineysaa horumarinta dalka, hanaqaadka dhismaha iyo khayraadka laf dhabarka u ah dhismaha (raw material), bilicda iyo Dhismaha guryo, sarooyin kala duwan oo tayo leh.

2. Xukuumaddu waxay bulshada ka gacan siineysaa una fududeyneysaa, dadaalada iyo hindisayaasha kala duwan ee lagu horumarinayo dalka, laguna dardar galinayo dib-u-dhiska dalka.

QODOBKA 29AAD
XAKAMEYNTA SARAHA IYO DHISME SHARCI DARO AH

3. Waxaa la hubinayaa hirgalka joogtusyada dhismaha sarooyinka iyo inta dabaq ee loogu tala galay goob walba magaalooyinka dalka.

4. Waxaa la xanibayaa inta laga hubinayo Xirfadleyaasha Shirkadaha dhismaha oo magacooda la galiyey diiwaanka ilaa inta magaciisu kujiro diiwaanka, waa inuu ogolaadaa inuu u aqbalo qaabka iyo nooca "Xirfadleyaasha Shirkadaha dhismaha diiwaan gashan" sida uu yahay ee guddigu ay ogolaadeen.

QODOBKA 30AAD
ILAALINTA DEEGAANKA, GOOBAHA, XARUMAHA IYO DHISMOOYINKA TAARIIKHIGA AH

1. Ilaalinta badqabka dhul xeebeedka, ka hortaga xaalufka ku socda Dhulka Soomaaliyeed.

2. Wasaaradda arrimaha gudaha, wasaaradda waxbarashada iyo wasaaradda howlaha guud waxay ka shaqeynayaa ilaalinta goobaha iyo xarumaha taariikhiga ah ee dalku leeyahay.

3. Waxay dabagalayaan heshiisyada caalamiga ah ee la xiriira ilaalinta iyo daryeelka dhismooyinka taariikhiga ah.

4. Waxay curinayaa shuruc u gaar ah xarumaha taariikhiga ah, badbaadinta sooyaalka taariikheed ee dalku leeyahay.

5. Deegaanka Waxay soo diyaarinayaa shuruuc Xukuumada Waxaa la hubinayaa hirgalka joogtusyada dhismaha sarooyinka iyo inta dabaq ee loogu tala galay goob walba magaalooyinka dalka.

6. Waxaa la xanibayaa inta laga hubinayo Xirfadleyaasha Shirkadaha dhismaha oo magacooda la galiyey diiwaanka ilaa inta magaciisu kujiro

diiwaanka, waa inuu ogolaadaa inuu u aqbalo qaabka iyo nooca "Xirfadleyaasha Shirkadaha dhismaha diiwaan gashan" sida uu yahay ee guddigu ay ogolaadeen.

QODOBKA 31AAD
QAABKA BIXINTA QANDARAASYADA

Wasaaraddu marka ay diyaariso qiimeynta iyo naqshaddaha hadba goobta la dhisaayo ama la dayactirayo kadib waxay bilaabaysaa qaabkan soo socda :-

1- Waxay muddo 7 cesho ah warbaahinta uga yeeri doontaa dhammaan shirkadaha ka diiwaan gashan wasaaradda howlaha guud.
2- Waxay u qaybin doontaa dukumintiga tartankaas dhammaan shirkaddaha ka soo qayb galay waxayna ku soo celin doonaan hadba muddada loogu talo galey
3- Dukumintaga ayaa lagu furi doonaa shirkadaha hortooda iyagoo loo akhrin doono shirkad waliba qiimaha ay soo gudbisay iyo sida ay u soo buuxisay shuruudihii tartanka
4- Muddo gaaban ka dib wasaaraddu waxay ku dhawaaqaysaa shirkaddii ku guulaysatay tartankaas waxayna wasaaraddu ka qancin doontaa shirkadihii haray sida looga guulaystay

QODOBKA 32AAD
HABSAMI U SOCODKA MASHAARIICDA,
DOORKA WASAARADDA EE QANDARAASYADA DHISMAYAASHA

1. Qorshaha Hormarinta Qaranka ayaa hagaya howlaha kala duwan ee nidaaminaya mashaariicda Qaranka iyo qorshayaasha lagu horumarinayo kaabayaasha dhaqaalaha.

2. Fadhiyada Guddiga farsamo ee Kaabayaasha dhaqaalaha ee la shaqeeya Wasaaradda Qorsheynta Qaranka ayaa lagu qaabeynayaa, mashaariicda iyo qandaraasyada kala duwan.

3. Si loo hubiyo, tayada farsamo iyo habsami u socodka howlaha la xariira naqshadeynta dhismayaasha kala duwan, hufanaanta iyo daahfurnaanto qadaraas bixinta, waxaa ku waajib ah dhinacyada ay khuseyso ama kuguda jira diyaarinta qandaraas dhisme, waa inay wasaaradda la socodsiiyaan, wixii qandaraas ah, si wasaaradda

hawlaha guud u hubiso dhinacyada farsamada iyo tayada qalabka dhismaha, isla markaana ay u gudato waajibkeeda shaqo.

4. Dhammaan shirkadaha xiriirka la leh, kana diiwaan gashan Wasaaradda Hawlaha guud, haddii ay helaan ama ay ku guuleystaan, qandaraas dhismo ama dayactir, laga fulinayo Dalka gudahiisa, sida mid ka mid ah dhismayaasha qaranka ama kuwa sida Qaaska ah loo leeyahay, waa in wasaaradda lala socodsiiyaa, si wasaaraddu HG u gudato kaalintii kormeer.

QODOBKA 33AAD
QODOBADDA KALA-GUURKA EE
LA XARIIRA DIB-U-EEGISTA SHURUUCDA KALA DUWAN DHISMAHA & DHULKA

1. Wasaaradda Hawlaha Guud iyadoo la tashaneysa laamaha kale ee dawladda ee ku lugta leh arrimaha dhulka iyo dhismaha, waxaa dib u habeyn iyo casriyeyn lagu sameeyay dhammaan shuruucda iyo xeerarka dalka ee la xariira ee Dhanka dhismayaasha iyo kaabayashaa dhaqaalaha dalka (infrastructure) sida ku xusan Buugga weyn ee Nidaamiyaha waxeyna kala yihiin:-
    a) Sharci gaar ah ayaa nidaamin doonta shaqaalaha kala duwan ee dhismaha.
    b) Shurci gaar ah aya Nidaamin doona tayada agabka iyo qalabka dhismaha (Quality Control).
    c) Shurci gaar ah aya Nidaamin doona bixinta qandaraasyada dhismaha dalka ee mashaariicda waaweyn ee Qaranka.
    d) Shurci gaar ah aya Nidaamin doona si faahfaahsan diiwaangalinta shirkadaha dhismaha & Mashaariicda la xariirta.
2. Wasaaradda Howlaha Guud, dib-u-dhiska & Guriyeynta, habka wax loo xafido iyo hannaanka diiwaanka guud ee naqshadeynta dhulka ay maamulayso Wasaaradda Hawlaha Guud.

QODOBKA 34AAD
DHAQANGALKA XEERKA

Hindise sharciyeedka wuxuuna dhaqan gelayaa isla marka Golaha shacabku uu ansixiyo, isla markaasna u Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalku uu saxiixo.